

## **Macluumaadka Ruqsada ee barnaamijka "Put Art in Parks"**

Dhacdooyinka darjiinka degmada [city park] lagu qabto ee la filaayo in dad tiro badan ayay ka soo qaybgalaan waxay u baahnaan doonaan hal ruqso ama in ka badan. Waxaan kugula talinnaynaa in sida ugu dhaqsaha badan ee suurtoogalka ah aad u soo dirsato codsiga ama arjiga ruqsada. Noocyo ka mid ah kulamada dhacdooyinka qaarkood waxaa la iska doonayaa in arjiga ruqsada la soo gudbiyo ugu yaraan 60 maalmood kahor inta dhacdada aan la qaban. Ruqsado qaarna waxa kaliya loo baahan yahay in ka yar laba todobaad oo horey ah in la soo sheego.

### **Ruqsada Isticmaalka Beeraha Darjiinka (Parks Use Permit)**

Helida **Ruqsada Isticmaalka Beeraha Darjiinka** waxay ku siinaysaa mudnaan ah in darjiinka dhexdiisa meel gaar ah aad ka isticmaali karto inta ay dhacdadu ay socoto. Ruqsada Isticmaalka Beeraha Darjiinka looma baahna, laakin waxaa dhici karta in dhacdada meel kale laga dhigo ama lagu qabto haddii aadan ruqsad haysan oo uu yimaado qof ruqsad u haysto isla goobta iyo isla saacaddaadaas ah, qofkaasoo ruqsad u haysta.

Xafiiska Jadwalka Dhacdooyinka Darjiinnada [Seattle Parks Event Scheduling Office] ayaa ah xafiiska u qaabilsan dhamaan daddooyinka darjiinka degmada lagu qabto oo dhan. Sicirka kirada ee saacaddiiba ee dhammaan darjiinnada, faahfaahin ku saabsan caymiska la isaga baahan yahay, ujrada arjiga iyo qarashka, iyo "Arjiga Ruqsada Isticmaalka Beeraha Darjiinka" halkan ayaa laga heli karaa:

[www.seattle.gov/parks/reservations/permits.htm](http://www.seattle.gov/parks/reservations/permits.htm)

Arjiga Ruqsada Isticmaalka Beeraha Darjiinka horey ayaad usoo gudbin kartaa hal sanno ka hor inta dhacdada aan la gaarin kahor ayaad soo gudbin kartaa.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Ruqsada Isticmaalka Beeraha Darjiinka:

- [www.seattle.gov/parks/reservations/permits.htm](http://www.seattle.gov/parks/reservations/permits.htm)
- 206-684-4080 (farriin faahfaahsan ku dhaaf)
- [Kyle.Griggs@seattle.gov](mailto:Kyle.Griggs@seattle.gov).

### **Ruqsada Meel Si Kumeelgaar ah oo Cuntada Lagu Iibiyo (Temporary Food Service Establishment Permit)**

Haddii shacabka aad cunto u fidinnayso oo dhacdadaada ay qayb ka tahay, waxaa dhici karta in aad u baahnaan doonto **Ruqsada Meel Si Kumeelgaar ah oo Cuntada Lagu Iibiyo**. Ruqsadan ayaa loo baahnaan doonaa marka cuntada aad iibinnaysid ama dadka aad iska siinaysid laba ruqsad ayaa dhici karta in aad u baahato, labadaba waa looga baahan yahay ganacsatada iyo kuwa aan faa'ido raadiska ahayn iyo kooxaha jaaliyadda labadaba.

Haddii aad u baahan tahay Ruqsada Meel Si Kumeelgaar ah oo Cuntada Lagu iibiyo, waxaa dhici karta in aad u baahato in aad keento meel cuntada lagu bixiyo oo ayna la socoto meel gacmaha la isaga dhaqo, iyo meesha waa inuu joogaa qof haysta Kaarka Shaqaalaha Cuntada "Food Worker Card" Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxyaabahan dhammaan waxaad ka heli kartaa bogga internetka ee waaxda caafimaadka:

[www.kingcounty.gov/healthservices/health/ehs/foodsafety/FoodBusiness/temporary.aspx](http://www.kingcounty.gov/healthservices/health/ehs/foodsafety/FoodBusiness/temporary.aspx)

Cuntooyin qaarkood looma baahna in aad hesho ruqsada **Ruqsada Meel Si Kumeelgaar ah oo Cuntada Lagu Iibiyo**. Ka Dayn:

[www.kingcounty.gov/healthservices/health/ehs/foodsafety/FoodBusiness/exemptions.aspx](http://www.kingcounty.gov/healthservices/health/ehs/foodsafety/FoodBusiness/exemptions.aspx)

Xusuusnaw: Haddii linkiyadan aysan shaqaynayn, waxaad ka raadisaa bogga internetka ee Waaxda Caafimaadka adiga oo isticmaalaya kalmadahan:

- Temporary Food Service Establishment
- Food Worker Card
- Food Permit Exemptions

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan **Ruqsada Meel Si Kumeelgaar ah oo Cuntada Lagu Iibiyo**:

- [www.kingcounty.gov/healthservices/health/ehs/foodsafety/FoodBusiness/temporary.aspx](http://www.kingcounty.gov/healthservices/health/ehs/foodsafety/FoodBusiness/temporary.aspx)
- 206-263-9566

### **Ruqsada Waaxda Dabdamiska**

Waxaa jira seddex arrimood oo ah marka ay dhici karto in aad u baahato Ruqsada Waaxda Dabdamiska:

- 1) Markii darjiinka la keenayo jekada lagu sameeyo hilibka [BBQ solin] oo wata dab "furan oo holaacaya"
- 2) Marka aad isticmaalaysid [canopy] oo 400 isquweer fiit ka wayn (20 x 20 fiit) ama anteenno (dhinacyo leh) oo 200 isquweer fiit ka wayn (10 x 20 fiit)
- 3) La filanayo in isla saacaddiiba ay ka soo qaybgasho in ka badan 99 qof

Ruqsaddaha Waaxda Dabdamiska waxaad ka heli kartaa bogga internetka:

[www.seattle.gov/fire/fmo/permits/permits.htm](http://www.seattle.gov/fire/fmo/permits/permits.htm)

### **Noocyada Ruqsadaha**

- Haddii aad keento makiinada hilibka BBQ, waxaad u baahnaan doontaa **Ruqsada Dab Furan oo Holaacaya** oo gaarka u ah makiinada aad wadato sida tan (dhuxusha, gaaska, ama qoryaha).
- Haddii aad isticmaalaysid makiinada BBQ ee ka dhisan darjiinnada degmada, lagaaga **ma** baahna in aad la timaado **Ruqsada Dab Furan oo Holaacaya** ee Waaxda Dabdamiska ay bixiso.
- Haddii aad isticmaalaysid teendhooyin (teendho dhinacyo ka furan, nooc 'furan') oo ka wayn 400 isquweer fiit (20 x 20 fiit), ama teendhooyin oo dhinacyo leh oo ka wayn 200 isquweer fiit (10 x 20 fiit), waxaad u baahnaan doontaa **Ruqsada Waaxda Dabdamiska ee Dhismaha ee (Air-Supported Structure Permit)**.
- Guud ahaan haddii isla saacaddiiba ay ka soo qaybgalayso in ka badan 99 qof, waxaa dhici karta in aad u baahato **Ruqsada Dhismaha** ee Waaxda Dabdamiska.

Macluumaad dheeraad ah:

- [www.seattle.gov/fire/fmo/permits/permits.htm](http://www.seattle.gov/fire/fmo/permits/permits.htm)
- Xafiiska Madaxa Dabdamiska (Fire Marshall), inta lagu jiro saacaddaha shaqada ee caadiga ah: 206-386-1450

### **Ruqsada Maalmaha Gaarka Ee Degmowaynta**

Waxaa dhici karta in dhacdooyinka qaarkooda ay abuuri karto waxyeelo wayn oo xuduuda darjiinka ka baxsan. Marka ay sidan oo kale dhacdo, waxaa dhici kara in loo baahdo in tallaabooyin dheeraad ah la qaado, sida qorshe lagu maareynaayo gawaarida, wadooyin la xirayo ama qaabab kale oo dhacdada lagu meelmariyo. Dhacdooyinka ay dhici karto in raad wayn ay reebto waxaa dhici karta in ay loo baahdo in ay codsadaan **Ruqsadda Dhacdada Maalmaha Gaarka ah ee Degmowaynta** *halka ay* ka ahaan la'hayd Ruqsada Isticmaalka Beeraha Darjiinka. Ruqsadda Dhacdada Maalmaha Gaarka ah ee Degmowaynta waxay isu keentaa wakiillo ka wada socda dhammaan waaxaha dhammaan degmooyinka ay saamayn karto. Haddii aadan hubin nooca ruqsad ee aad u baahnaan doontid, waydii shaqaalaha Jadwalka Dhacdooyinka Darjiinnada Seattle (Seattle Parks Event Scheduling). Iyaga ayaa kaa caawin doona oo kuu sheegi doona haddii aad u baahan tahay Ruqsada Isticmaalka Beeraha Darjiinka ama haddii aad u baahan tahay Ruqsad Dhacdada Maalmaha Gaarka ah ee Degmowaynta. Eeg macluumaadka kore ee qaabka aad ula xiriirayso shaqaalaha Jadwalka Dhacdada Darjiinka qaabilsan. Macluumaad dheeraad ah ee Ruqsaddaha Dhacdada Maalmaha Gaarka ah ee Degmowaynta: [www.seattle.gov/special-events-office](http://www.seattle.gov/special-events-office)